SOOMAALI

Norwegian Directorate for Children, Youth and Family Affairs

NATIONAL PARENTS' COMMITTEE FOR KINDERGARTENS fub

CARRUURTA IYO KALA TAGGA

Shaqaalaha xannaanooyinka carruuraha iyo la kulankooda carruuraha ay waalidkood kala tageen.



Carruur ka badan 20 000 ayaa sanadkiiba la kulma in ay waalidkood kala tagaan ama kala guuraan. Waxaa intaas dheer dhawr kun oo wada noolaa carruurna isu lahaa oo iyaguna kala guura. Waalidku intooda badan si wanaagsan ayay u wada shaqeeyaan marka ay kala tagayaan iyo kala tegidda kaddibba, carruurta intooda badanna way la qabsadaan xaaladda cusub.

Hadafka sharciga xannaanooyinka carruuraha wuxuu hoosta ka xarriiqayaa in dhammaan hawlaha carruurta loo qabanayo ay noqdaan kuwa lala kaashanayo guriga ilmaha. Waxay weliba tani si gaar ah u khusaysaa waalidka kala tagay. Marka ay waalidku ku guuldarraystaan in ay wada shaqeeyaan, xannaanada carruurta ayaa ilmaha aad muhiim ugu noqonaysa. Si haddaba ay xannaanada carruuurto kaalintan u gudato waxaa lagama maarmaan ah in ay xannaanada carruurtu leedahay nidaam shaqo oo wanaagsan laguna baraarugsan yahay wada shaqaynta waalidka.

Waxaa loo baahan yahay in marka uu ilmuhu billaabo xannaanada carruurta in sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaggalka ah in kalsooni looga dhex abuuro waalidka iyo shaqaalaha xannaanada carruurta. Waxaa kale oo iyana wanaagsan in uu jiro hab wanaagsan oo loola dhaqmo carruurta iyo waalidka marka ay waalidku kala tagaan. Shaqaalaha xannaanada carruurta waa in ay si feejignaan leh ula socdaan falcelinta iyo habdhaqanka carruurta kaddib marka la kala tago, oo ay waalidka kala hadlaan waxyaalaha ay arkaan. Sida ilmaha u roon marka la eego waxaa muhiim ah in ay shaqaaluhu waalidka ka codsadaan in ay xaaladda ka fikiraan. Looma baahna in sida loo qaabbilayo ilmaha gaarka ah iyo waalidka ku sugan xaaladda nololeed ee adag in ay ahaato mid ku xiran hadba qofka ay la kulmaan. Waxaa loo baahan yahay dhammaan dadka ka shaqeeya xannaanada carruurta in ay yihiin kuwo garan kara haddii uu ilmaha dhib haysto. Waxaa kale oo loo baahan yahay in shaqaalaha oo dhan ay aqoon u leeyihiin sidii ay u caawin lahaayeen waalidka uu khilaafku ka dhexeeyo. Hoggaamiyaha ayay mas'uuliyadda koowaad ka saaran tahay in uu la socdo oo hubiyo in dhammaan, xataa shaqaalaha cusub, ay helaan aqoonta noocan ah.

Buugyarahani wuxuu ku salaysan yahay heshiiska xaquuqda carruurta ee QM iyo cilmibaaris cusub. Buugyaruhu wuxuu sare u qaadayaa aqoonta shaqaalaha xannaanada carruurta marka ay qaabbilayaan carruurta iyo waalidka kala tagga waalidka kaddib, wuxuuna shaqaalaha xannaanada carruurta ka caawinayaa sidii ay ilmaha u siin lahaayeen goob laysku hallayn karo, ammaan ah oo wanaagsan.

Waxaa sidoo kale buugyaraha la isticmaali karaa mararka la qabanayo kulammada maaddada iyo maalmaha mawduucyada gaarka ah xannaanada carruurta looga hadlayo iyada oo loo isticmaalayo sidii arrimahaas looga wada hadli lahaa.

Waxaan rajaynaynaa in uu buugyarahani gacan ka geysto in ay maalinta xannaanada carruurtu noqoto mid wanaagsan oo ay meel ammaan ah oo lagu barbaaro u noqoto carruurta oo dhan.

Agaasinka qoyska, carruurta- iyo dhallinyarada iyo Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruuraha, jannaayo 2015.

§

Sida ilmaha u roon iyo heshiiska xaquuqda carruurta ee QM

Sida ilmaha u roon waa mabda'a sare ee qaranka iyo midka caalamiga ahba. Taas oo micnaheedu yahay in loo baahan yahay in tixgelinta koowaad la siiyo sida mar kasta ilmaha u roon oo qiimayn lagu samaynayo go'aan ilmaha khuseeya.

Mabda'a sida ilmaha u roon wuxuu ku qoran yahay heshiiska xaquuqda carruurta ee QM qodobkiisa 3-aad lambarka 1-aad:

Dhammaan falalka carruurta khuseeya, ha gaareen hay'ado dawladeed ama kuwo samafal oo barayfat ah, maxkamadaha, mas'uuliyiinta maammulka ama unugyada sharciga soo saara, waxaa loo baahan yahay in tixgelin aasaasi ah la siiyo sida ilmaha u roon.

KALA TAGGA WAALIDKA – DHIBAATO WEYN OO CARRUURTA KU TIMAADDA

Waalid badan ayaaa ku guuleysta in ay si wanaagsan u wada shaqeeyaan marka ay kala tagaan kaddib, qoyskuna nololmaalmoodkooda cusub ayay la qabsadaan iyaga oo aan taa dhib badan kala kulmin. Laakiin xubnaha qoyska qaar baa hubi waaya sida ay nolosha qoysku mustaqbalka noqon doonto.

Lammaanaha uu dhibku ka haysto waalidnimada carruurta ay wadaagaan kaddib markii ay kala tageen ayaa waxaa laga yaabaa in ay khilaafka aad ugu mashquulaan, oo waxaa markaas ku adkaan karta in ay ka soo baxaan kaalinta waalidnimo. Dadka qaar bay arrintani dhib ku noqotaa marka uu kala taggu dhaco ka hor inta aan xaaladda cusub lala qabsan, meesha ay qaar kale arrintan dhibto muddo dheer oo laga yaabo in ay dhib ku hayso korriinka ilmaha oo dhan. Kala taggu wuxuu saamayn karaa ku xirnaantii ammaanka lahayd ee ay ilmuhu waalidka ku xirnaayeen taas oo hubidla'aan ku beeri kara ilmaha haddii aanay waalidku lahayn heshiisyo iyo xalal wadashaqayneed oo cad.

Khilaaf waalidka dhex mara

Waxaa muhiim ah in la qiimeeyo cawaaqibka uu kala tagga waalidku ilmaha u keenayo. Waalid badan ayaa dhib badan ku jira marka la kala tagayo, laakiin haddana ku guuleysta in ay si wanaagsan u shaqeeyaan marka la eego dhinaca carruurrta. Qaar kale oo waalidka ka mid ahna wuxuu khilaafkoodu gaaraa meel fog oo saamayn xun ilmaha ku yeeshaa, taas oo wax u dhinta horummarka ilmaha. Markaas waxaa xannaanada carruurta laga rabaa hawl muhiim ah taas oo ah in ilmahaas laga taxaddaro.

Maxay shaqaalaha xannaanada carruurtu si gaar ah isha ugu hayn karaan? Waxaa halkan ku qoran su'aalo lagu qiimeeyo heerka khilaafka, kuwaas oo lagala munaaqishoon karo dadka aad isla shaqaysaan.

- Aad miyay waalidku u murmaan?
- Khilaafku ma wuxuu u badan yahay markii la kala tagay mar u dhow oo ka danbeeyay, mise waa mid waaray oo aan xal loo hayn?
- Dhibka waalidka dhex yaalla ma lagu arkaa xannaanada carruurta mise waxay waalidku u eg yihiin kuwo deggan oo wax isku raacsan?
- Marka aanay waalidku wax isku raacsanayn; waa maxay waxa aanay isku raacsanayn?
- Khilaafkooda ma ku jiraa weerar qofka shakhsiyaddiisa la weerarayo iyo cadaawo?
- Waalidku ma ku guuleystaan in ay ilmaha wax walba ka hor mariyaan, mise khilaafka ayaa intuu aad u bato ayay hilmaamaan waxa ilmaha u roon?
- In intee le'eg ayuu khilaafku gaarsiisan yahay? Shaqaaluhu ma dhibsadaan la kulanka waalidka?
- Waalidku ma yihiin kuwo horusocod ah oo xalliya

waxyaalaha aanay isku raacsanayn?
- Labadooduba taas ma ka qaybqaataan?
- Gacanqaad, hanjabaad, sarkhad iyo /ama dhibaato maskaxiyan ah oo halis ah ma jiraan?
- Khilaafku ma waaray? Welwelka ay shaqaaluhu ka qabaan korriinka ilmaha ma mid sii kordhayaa?
- Khilaafka waalidka ilmaha ma saameeyaa? Sidee ayuu u saameeyaa?

Marka ay waalidku ka wada shaqayn waayaan sida ilmaha u roon, ayayba sii kordhaysaa muhiimadda xannaanada carruurta. Haddii aanay waalidku arkin baahida ilmaha, shaqaalaha ayaa mas'uul ka ah in taas waalidka dareensiiyaan.

Waalidku waa kuwa ugu muhiimsan ee ay carruurtu uga daydaan sidii ay ku baran lahaayeen oo aqoon ugu yeelan lahaayeen sida si wanaagsan oo ammaan leh xiriir loola yeesho dadka kale. Haddii ay waalidku muddo dheer isku xun yihiin, waxay taasi saamayn kartaa awoodda ay carruurtu u leeyihiin in ay khilaafaadka xalliyaan oo ay dadka kale xiriir wanaagsan la yeeshaan. Sidaas ayayna arrintani ku saamayn kartaa oo raad ugu yeelan kartaa xiriirka uu ilmuhu dadka kale la leeyahay laga billaabo marka uu xannaanada carruurta dhiganayo. Xannaanada carruurta ayaa aqoonta noocan ah ka caawin karta carruurta aan waalidkood ka helin caawintii ay u baahnaayeen. Sidaas darteedna xannaanada carruurtu waxay noqonaysaa meel muhiim u ah sidii uu ilmuhu u baran lahaa xallinta khilaafaadka iyo dhisidda xiriirrada.

Saamaynta ilmaha

Waalidku waa dadka ugu muhiimsan nolosha ilmaha. Marka ay waalidku ku sugan yihiin xaalad adag ama ay khilaaf ku jiraan, kadeedka (istareeska) ayaa waalidka iyo carruurtaba ku kordha. Carruurta oo uu kadeedku ku bato iyo waalid aan in badan u soo jeedin ayaa saamayn ku yeelan kara horummarka ilmaha.



> Aabbe iyo hooyo weligood isma salaamaan. Waa wax lala yaabo!
>
> **Wiil, 3 sano**

Marka ay waalidka isku xun yihiin ama ay is neceb yihiin, ilmuhu markaa wuu u fiirsanayaa oo wuxuu la soconayaa sida uu xaalkoodu yahay. Carruurtu waxay aad ugu dadaalaan in waalidka xaaladdoodu wanaagsanaato, taas oo carruurta ku adkayn karta in ay dareenka bartaan oo maareeyaan. Ilmo kadeed ku furan yahay si fudud buu ammaanku uga lumaa ilmahana waa ku adkaanaysaa in uu fahmo wada shaqaynta dadka kale. Cawaaqifbka arrintan ayaa noqon kara in ay ilmaha ku adkaato ciyaarta iyo saaxiibnimada xannaanada carruurta.

Waan cabsoodaa marka ay hooyo indhaha ku gubto aabbe – mararka qaarkood indhaha ayay galka ka soo bixisaa markaan u sheego wixii aan aniga iyo aabbe wada qabannay sabtidii iyo axaddii.

Gabar, 6 sano

Waalidnimadu way sii soconaysaa xataa marka la kala tago kaddib:

- Khilaafka labada waalid ka dhexeeya ma aha arrin ilmaha khuseysa.
- Waalidku waa in ay u feejignaadaan baahida iyo dareenka carruurta kala tagga kaddib, waana in aan kuwaas lagu khaldin baahida iyo dareenka waalidka.

Falcelinta ilmaha

Carruurtu way kala duwan yihiin siyaalo kala duwan ayayna uga falceliyaan khilaafka waalidka dhex mara. Carruurta qaarkood ayaa hubidla'aan iyo in aanay firfircoonayn muujiya. Qaar kalena xasilloonidarro iyo in ay is qoqobaan ayaa lagu arkaa. Qaar baa xaaladda u arka mid culus oo labada waalid midkood bay la jirsadaan, meesha ay qaar kale ku dadaalaan in ay caddaalad ka dhex dhacdo labada waalid. Carruurtu da'day doonaan ha jireenne khilaafka waalidku waa arrin khatar ah.

Waxaan is weydiinayaa in aan anigu mas'uul ka ahay muranka hooyo iyo aabbe?

Gabar, 4 sano

Ilmuhu marka ay yar yihiin had iyo jeer ma sheegaan sida xaaladdoodu tahay, iyo sida ay u arkaan xaaladdooda guriga. Waa muhiim in shaqaalaha xannaanada carruurtu in ay ka war hayaan carruurta ay waalidkood kala tageen ayna eegaan calaamado muujinaya in uu ilmuhu xaalad adag ku sugan yahay. Carruur markii hore ammaan ku dareemi jiray dhammaan xaaladaha kala kala duwan ee xannaanada carruurta, ayaa xasilloonidarro dareemi kara, tusaale ahaan mararka ciyaartii gudaha inta laga tago bannaanka loo baxayo oo lagu soo ciyaarayo. Carruurta qaarkood baa muddo gaaban ama dheer dib ugu noqda waxyaalo ay ka soo gudbeen oo waxay billaabaan in ay isticmaalaan cijirka masaasadda ilmaha caanaha lagu siiyo ama in ay isku kaadiyaan. Waxaa kale oo iyana dhici karta in uu ilmuhu hal mar ka baqo xaalado aanu waagii hore ka baqi jirin, ama uu aad ugu dhegdhego dadka waaweyn. Carruurta qaarkood ayaa hurdada iyo cuntaduda ay ka xumaataa, meesha carruuraha qaarkood uu qaabka dareenka wejigoodu uu is beddelo, oo uu tusaale ahaan adkaado ama mid mar walba isku mid ah noqdo.

Horummarka ilmaha

Da'da iyo korriinka ilmaha ayaa saameeya sida uu ilmuhu ula qabsado kala tagga waalidka. Carruurta intooda badan marka ay waalidku kala tagaan waxay dareemaan murugo iyo hillow, laakiin siyaalo kala duwan ayay kuwaas u muujiyaan. Nuglaanta ilmaha kala tagga kaddib waxay noqon kartaa mid ogaanshaheeda waalidka dhibi karta oo xanuun leh. Waxaa sidaas darteed dhici karta in uu imuhu nuglaantaan qariyo isaga oo waalidkaas u naxariisanaya, maxaa yeelay ma doonayaan in ay waalidkood xumaan dareemaan. Carruurta qaarkood waxaa muhiim u noqon karta in ay murugadaan kala hadlaan qof xannaanada carruurta ka shaqeeya, shaqaalaha xannaanada carruurtu maaddaama ay xirfadalayaal yihiin iyaga ayaa ku habboon wax ka qabashada dareenka ilmaha.

Carruurta qaar baa u hillooba labada waalid midka ay markaas la joogaan ma ahee kan kale. Shaqaalaha xannaanada carruurtu waxay ilmaha u sheegi karaan in la oggol yahay in xumaan la dareemo, oo loo hilloobo wakhtigii ay waalidku wada noolaayeen, ama ay rajeeyaan in ay waalidku isku soo laabtaan. Dhinaca kalena, carruurta la kulmay khilaaf halis ah, sarkhad iyo/ama cudur maskaxeed ku yimaada labada waalid midkood, ayaa waxaa dhici kara in ay kala tegidda ka helaan ammaan dheeri ah.

Waxyaalo horummarka ilmaha saamayn kara kala tagga kaddib:

- Ilaa intee buu mid xasilan yahay nidaamka wadajoogista ilmaha iyo waalidka?
- Ilaa intee ayay wadashaqaynta iyo wadahadalka waalidku wanaagsan tahay?
- Kala tagga ka hor sidee ayay ahayd ku xirnaashaha uu ilmuhu ku xirnaa labada waalid?
- Sidee ayay waalidku ugu feejigan yihiin ilmaha iyo gudbinta dareenkiisa?
- Sidee buu u wanaagsan yahay xiriirka ka dhexeeya ilmaha iyo shaqaalaha xannaanada carrurta?
- Sidee bay shaqaaluhu u fahmaan dareenka ilmaha?
- Ma jiraan dad kale oo waaweyn oo ilmaha muhiim u ah?
- Heerkee ayuu gaarsiisan yahay khilaafka waalidku?

Petter (5 sano)

wuxuu weligiis ahaan jiray mid deggan oo taxaddar miiran ah. Hadda sidii hore wuu ka sii xasilloon yahay oo waxaa la oran karaa lamaba moodo in uu xannaanada carruurta joogo.

Emilia (4 sano)

weligeed dhib la'aan baa xannaanada carruurta la keeni jiray. Hadda laakiin aabbe iyo hooyo ayay ku dhegtaa marka ay tegayaan.

Oscar (3 sano)

wuxuu weligiis ahaan jiray mid ciyaar jecel oo orod badan. Hadda waxaa xannaanada carruurta dhib ka haystaa sidii xad loogu dhigi lahaa, wuxuuna billaabay in uu carruurta kale qaniino.

WEEROOYIN MUHIIM AH

Si ay shaqaalaha xannaanada carruurtu wadashaqayn wanaagsan waalidka ula yeeshaan, waxaa muhiim ah in aqoon loo leeyahay xaqa iyo waajibaadka uu sharcigu waalidka siinayo marka uu kala tag yimaado. Shaqaalaha xannaanada carruurta waxaa ku adkaan kara in ay ogaadaan sidii ay ula dhaqmi lahaayeen waalidka iyo mas'uuliyaddooda inta kala tagga lagu jiro iyo muddada ka danbaysa.

Weerooyinka inta badan la isticmaalo marka uu furriin ama kala tag dhaco waa:

- 1mas'uuliyad waalid
- mas'uuliyad waalid oo la wadaago
- goob degaan oo rasmi ah
- goob degaan oo rasmi ah oo kala duwan
- wadajoogis

Mas'uuliyad waalidnimo

§

Sharciga carruurta § 30 waxaa ku qoran: «Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu dadka ay mas'uuliyadda waalidnimo ka saaran tahay in uu ka helo daryeel iyo in ay ka fikiraan. Waxay xaq iyo waajib ba u leeyihiin in ay ilmaha u gaaraan go'aammada waxyaalaha uu qof ahaan u baahan yahay kuwaas oo ku xaddidan sida ay dhigayaan § 31 ilaa 33.

Mas'uuliyadda waalidka waxaa la gudanayaa iyada oo la eegayo danaha iyo baahida ilmaha. (...)»

Mas'uuliyadda waalid waxay waajib ka dhigaysaa in ilmaha la daryeelo, xaqna loo lahaado in ilmaha loo gaaro go'aammada la xiriira waxyaalaha kala duwan ee uu qof ahaan u baahan yahay sida ilaalinta iyo mas'uuliyadda uu sharciga abbaanku saaro abbaannada (vergemål), daaweynta, doorashada xannaanada carruurta iyo dugsiyada iyo u guuridda dalka dibeddiisa.

Mas'uuliyad waalid oo la wadaago

§

Sharciga carruurta § 37 waxaa ku qoran in uu go'aammada gaari karo qofka uu ilmuhu joogtada ula nool yahay.

Haddii ay waalidku wadaagaan mas'uuliyadda waalidka, laakiin uu ilmuhu midkood joogto ula nool yahay, midka kale ma hor istaagi karo in uu midka uu ilmuhu la nool yahay gaaro go'aammo muhiim u ah daryeelka ilmaha, sida su'aasha ah in uu ilmuhu xannaano carruur dhiganayo, meesha uu dalka kaga noolaanayo iyo go'aammada kale ee waaweyn oo nololmaalmeedka.

Labada waalidba xaq bay u leeyihiin waajibna way ku tahay in ay ilmaha u gaaraan go'aammada waxyaalaha qof ahaantiisa khuseeya, ilmaha siiyaan barbaarin iyo masruuf macquul ah, waxbarasho ah inta ilmuhu karo kuna habboon. Caadiyan waxaa markaa loo baahan yahay in ay xannaanada carruurtu labada waalid isku mar warbixin isku mid ah ka siiso ilmaha, sida warbixinta wadahadalka waalidka, kulanka waalidka, baaritaannada, u kuurgelidda, dhibidda ama welwelka laga qabo horum-marka, la shaqaynta iyo wixii la mid ah.

Goob degaan oo joogto ah

§

Sharciga carruurta ee § 36 wuxuu dhigayaa in ay waalidku ku heshiin karaan in uu ilmuhu si joogto ah ula noolaado labada waalid midkood ama labadoodaba.

Haddii ay waalidku isku raaci waayaan, waa in ay maxkamadi go'aamisaa in uu ilmuhu si joogto ah labadooda midkood ula noolaanayo. Haddiise ay jiraan sababo gaar ah, waxay maxkamadu go'aamin kartaa in uu ilmuhu labadaba si joogto ah ula noolaanayo.

Weerta «xaggee ayuu ilmuhu joogto ugu noolaanayaa », waxay inta badan wax ka sheegeysaa labada waalid midka uu ilmuhu inta badan la nool yahay. Meesha uu ilmuhu joogtada ugu nool yahay inta badan waa meesha uu ilmuhu wakhtiga intiisa badan ku nool yahay, inkasta oo laga yaabo in uu ilmuhu wakhtiga 50 % la joogo waalidka kale. Waxaa kale oo ereygu wax ka sheegayaa xaqa go'aaminta ee uu leeyahay waalidka uu ilmuhu sida joogtada ah ula nool yahay. Tusaale ahaan haddii ilmuhu xannaano carruur dhiganayo, meesha uu ilmuhu dalka uga noolaanayo, doorashada firfircoonida la qabto wakhtiga firaaqada la yahay, ka-qaybqaadashada xafladaha dhalashada, cuntada, labbiska, wakhtiyada jiifka, saaxiibbada, ilaalinta iyo hagaajinta iwm.Normally the person who has the day-to-day care and the person who has the right to access have joint parental responsibility.

Sida caadiga ah qofka mas'uulka ka ah nololmaalmeedka ilmaha iyo midka xaqa u leh in ay wada joogaan, way wadaagaan mas'uuliyadda waalidnimo.

Goob degaan oo rasmi ah oo kala duwan

Goob degaan oo kala duwan waxay jirtaa oo keliya marka ay waalidku isku raacsan yihiin in ay jirto goob degaan oo kala duwan. Ilmuhu labada waalidba si joogto ah ayuu ula deggan yahay, tusaale ahaan labadii toddbaadba mid buu hooyo la joogaa midna aabbe ayuu la joogaa. Heshiis goob degaan oo kala duwan wuxuu noqon karaa in uu tusaale ahaan ilmuhu 60 ama 70 % wakhtiga uu la joogo labada waalid midkood, meesha uu 40 ama 30 % wakhtiga la joogo waalidka kale. Marka uu ilmuhu joogto ula nool yahay labada waalidba, waxay taasi la mid tahay in xaqa go'aaminta uu labada waalidba saaran yahay oo ay wadaagaan. Labada waalid xaq isku mid ah ayay u leeyihiin nolol maalmeedka ilmaha.

Wadajoogista

Waalidka kooda aanay ilmuhu joogtada ula noolayn, ayaa wuxuu caadiyan ilmaha la qaataa wadajoogis.

In kasta oo aan Bardufoss degganahay Lucas-na uu hooyadiis Oslo kula nool yahay, haddana had iyo jeer warbixin teeda la mid ah ayaan ka helayay xannaanada carruurta. Waa wax wanaagsan in aan ogaado goorta uu Lucas fasaxa iigu imaanayo.

Aabbe leh mas'uuliyad waalidnimo oo la wadaago

KAALINTA XANNAANADA CARRUURTA

Sida ay shaqaalaha xannaanada carruurtu u dhaqmaan oo ula socdaan carruurta iyo waalidka ku sugan xaaladda kala tagga, ayaa qayb weyn ka qaata dareenka ammaanka ee ilmaha iyo waalidka labadaba.

Xannaano carruur oo ammaan ah

In lala socdo oo loo nuglaado dareenka iyo baahida carruurta ayaa ah hawsha waalidka ugu muhiimsan. Awoodda ay dadka waaweyn u leeyihiin in ay la socdaan dareenka carruurta una suurageliyaan nolol deggan oo ammaan ah, ayaa ka mid ah hawlaha ugu muhiimsan ee xannaanada carruurta ka dhaca. Dadka waaweyni waa in ay ilmaha ka caawiyaan sidii uu ilmuhu u sheegi lahaa waxyaalaha uu ilmuhu muujinayo laakiin aanu aqoonnin luuqad uu ku sheego. In dareenka afka laga sheego waa wax loo baahan yahay in la sheego, waana in la bartaa dareemmada kala duwan.

In qofka la fahmo oo uu dareemo in ay dadka kale dareenkiisa la socdaan, waxay qofka siisaa kalsooni. Waxay arrintani si gaar ah muhiim ugu tahay carruurta, maaddaama aanay da'dooda iyo korriinkooda dartood awood u lahayn in ay dareenkooda afka uga sheegaan si la mid ah sida dadka waaweyn. Maskaxda carruurtu korriinkii ma dhammaysan, wayna fududdahay in ay dareen ahaan wareeriyaan oo ka bataan waxyaalaha ka dhacaya agagaarka ilmaha. Haddii uu khilaaf ka dhaco agagaarka ilmaha, waxaa wanaagsan in ay dadka waaweyn ee xannaanada carruurta jooga ilmaha ag joogaan oo ay fahmaan waxa uu ilmuhu sheegayo iyaga oo taas ku muujinaya hadal ahaan iyo habdhaqan ahaanba. Taasi waxay keeneysaa in uu ilmuhu mar kale kalsooni dareemo. Shaqaalaha way ku adag tahay in ay ilmaha oo dhan isku si ula socdaan, laakiin waxaa suurtaggal ah in ay qof weyn oo muhiim ah u noqdaan carruurta kuwooda baahida ugu badan u qaba.

Kaalinta xannaanada carruurta ee ilmaha

Xannaanada carruurtu hor iyo horraanba waa goobtii carruurta, waana meel ay ilmuhu ku nafisaan marka ay xaaladda gurigu adkaato. Ilmuhu waa in uu xooggiisa ku isticmaalo horummarkiisa iyo korriinkiisa ee ma aha in uu ka fikiro khilaafka dadka waaweyn ka dhexeeya. Sidaas

darteedna waa muhiim in ay xannaanada carruurtu ilmaha si gaar ah uga taxaddarto marka ay waalidku kala tagaan ama ay dhibaato dhex taallo.

Carruurta ay waalidkood kala tagaan waxay aad ugu baahan yihiin in ay shaqaaluhu arkaan, daryeel iyo laab-qaboojin dheeraad ah. Micne weyn ayay shaqaaluhu u leeyihiin ilmaha gaarka ah, xiriir ammaan ah oo ay la yeeshaan ayaana ilmaha u noqon kara difaaca ugu wanaagsan ee uu ilmuhu heli karo. Ilmuhu wuxuu u baahan yahay dhab ammaan ah oo uu ku nasto iyo in si ammaan ah oo isu miisaaman loo mashquuliyo. Waa in uu ilmuhu fursad u helaa in uu ka sheekeeyo sida uu xaalki-isu yahay, iyada oo aanay shaqaaluhu ilmaha ku cadaadin in uu warramo isaga oo aan weli taas diyaar u ahayn.

> Ilmuhu sida uu isaga warramo waxay ku xiran tahay sida ay dadka waaweyn ilmaha u dhegeystaan oo u fahmaan.
>
> **Gamst iyo Langballe, 2006**

Kaalinta xannaanada carruurta ee waalidka

Waalidka ayay mas'uuliyadda koowaad ka saaran tahay barbaarinta carruurta. Xannaanada carruurtu waa bey'ad ilmaha sii caawinaysa, mas'uulna ka ah in xiriir fiican iyo wadashaqayn lala yeesho labada waalidba. Waxaa loo baahan yahay in ay shaqaaluhu waalidka iyo carruurta labadaba uga taxaddaraan si wanaagsan oo ay fahmaan, si wanaagsanna uga shaqeeyaan sidii ay xiriir soke oo ammaan ah dhammaan ula yeelan lahaayeen laga billaabo muddada la-qabsashada. Haddii uu kala tag dhaco shaqaaluhu waa in ay kaalintooda ogaadaan marka ay waalidka la kulmayaan. Way adkaan kartaa in xiriir lala lahaado waalid uu khilaaf ka dhexeeyo, weliba haddii uu shaqaalaha xannaanada carruurtu labada waalid midkood sambaatiyo u hayo. Shaqaalaha xanna-anada carruurta ee ku baraarugsan kaalintooda shaqo, ayay u fududdahay in uu la kulmo dadka ku sugan xaala-daha nolosha ee kala duwan. Taas ayaa u fududayn karta in uu labada qof midkood la jirsado.

> Shaqaalaha xannaanada carruurtu labadayaba si xushmad iyo fahan leh ayay noo qaabbileen iyaga oo aan midkeenna la jirin. Taasi ammaan iyo kalsooni ayay na gelisay.
>
> **Hooyo kala tag kaddib**

U WADASHAQAYNTA SIDA CARRUURTA U ROON

Hawsha lagu kasbanayo kalsoonida waalidka waa in ay billaabataa marka uu ilmuhu xannaanada carruurta billaabo. In la abuuro xiriir wanaagsan waxay sahlaysaa sidii uu xiriir wanaagsan oo ay kalsooni ku dheehan tahay u dhex mari lahaa xannaanada carruurta iyo labada waalid. Sidaas darteed, waa in xiriirka wanaagsan la abuuraa marka ay xaaladdu wanaagsan tahay. Shaqaaluhu waa in ay waalidka la kulmi karaan oo kala hadli karaan waxyaalaha caadiga ah ee maalin walba dhaca iyo haddii ay dhibaato timaaddo labadaba.

Waxyaalaha layska filayo

Kala caddeeya oo isla ogaada waxyaalaha uu qofba qofka kale ka filayo si loo abuuro wadashaqayn macquul ah, loogana hor tago is-fahandarro. Wadashaqaynta guriga iyo xannaanada carruurtu waa in ay ahaataa mid ku dhisan citiraafid iyo xushmad. In dadka waaweyn kalsooni ka dhexayso, ayaa waxay iyana sare u qaaddaa dareenka ammaanka iyo ka-helidda ee ilmaha jooga xannaanada carruurta.

Qolka dharka la surto

Qolka dharka la surto alaaba waa bar kulan oo muhiim ah marka ilmaha la keenayo ama laga wadayo xannaanada carruurta, waxaana laga yaabaa in ay tahay meesha ugu muhiimsan ee ay waalidka iyo shaqaaluhu isku arkaan. Marka ilmaha xannaanada carruurta la keenayo ama laga wadayo ayaa ah kala-guurka guriga iyo xannaanada carruurta.

Shaqaalaha xannaanada carruurta ayaa meesha dharka la surto uga dhigi kara waalidka iyo carruurta aag wanaagsan oo ammaan ah. Waxaa muhiim ah in waalidka loo sheego in meesha dharka la surto aanay ahayn meel ay dadka waaweyni mawduucyo culus uga wada hadlaan, weliba aan loo baahnayn in ay kuwaas ilmaha korkooda uga hadlaan. Waxay weliba taasi khuseysaa in wax aan fiicnayn laga sheego labada waalid kooda aan markaas meesha joogin. Waa muhiim in arrintan lagu baraarugo, maxaa yeelay maalintu waa hawl miiran, waxaana dhici karta in uu qofka ka soo baxo hadal uusan si fiican uga fikirin. Mararka ilmaha la keenayo ama la wadayo waa in muhiimku ilmaha ahaadaa, wadahadalka dadka waaweyna ilmaha laga qayb geliyaa. Wadahallada mawduucyada culus waa in ay ka dhacaan qolol kale iyada oo aanay carruurtu halkaa joogin.

> Waa wax wanaagsan marka ay dadka waaweyni aabbe xataa ka hadlaan, in kasta oo aanay aabbe iyo hooyo hadda isla noolayn.
>
> **Gabar, 5 sano**

Warbixin wanaagsan

In warbixinta loo baahan yahay ay xannaanada carruurtu u gudbiso labada waalidba ayaa muhiim ah, maaddaama aanay shaqaaluhu fili karin in ay waalidku is wargeliyaan. In xiriir wanaagsan labada waalidba lala yeesho kala tagga kaddib ayaa iyana muhiimad weyn leh. Sidaas ayayna shaqaaluhu ku muujinayaan in ay ka taxaddarayaan labada waalidba. Taas oo iyana ah mid ilmaha u wanaagsan kalsoonina ku beereysa.

HABABKA AY XANNAANADA CARRUURTU U SHAQAYSO

Xannaanooyinka carruuraha oo idil waa in ay lahaadaan hab wanaagsan oo ay u uga taxaddaraan waalidka kala tagay oo weliba uu khilaafku dhex yaallo.

Hababka shaqada ee xannaanada carruurtu waxay noqon karaan:
Kulanka waalidka ee koowaad ayuu hoggaamiyuhu ku sheegi karaa in xannaanada carruurtu ay doonayso in ay wadashaqayn hoose oo ammaan ah in ay waalidka la yeelato, eeg qodobka hadafka ee sharciga xannaanada carruurta. Hoggaamiyuhu wuxuu fursaddan uga faa'ideysan karaa in uu waalidka ku boorriyo in ay madaxa barbaarinta ama xiriiriyaha koowaad ee ilmaha ku wargeliyaan wixii dhacdooyin ah ee khaas ah ama xaalado ah ee qoyska ka jira, kuwaas oo laga yaabo in ay muhiim tahay in ay xannaanada carruurtu ogaato.

1

Marka ay waalidku xannaanada carruurta wargelinayaan:
Qofka shaqaalaha ah ee warbixinta loo sheegayo waa in uu hadalka si wanaagsan u dhegaysto isaga oo wakhti siinaya qofka u warramaya, citiraafaa waxa loo sheegayo su'aalana ka weydiiyaa. Sidoo kale waalidka kala hadal cidda warka loo gudbin karo.

2

Marka xannaanada carruurta loo sheego furriin/kala tegid:
Madaxa barbaarinta ayaa kulan lagu wada hadlo isugu yeeraya marka warbixintan la soo gudbiyo mar u dhow. Waa muhiim in labada waalidba loo yeero, oo ay helaan warbixin isku mid ah.

3

Su'aalaha loo baahan yahay in wadahadalka lagu kala caddeeyo waxay noqon karaan:

- Muxuu ilmuhu og yahay? Waa maxay baahida ilmaha ee wakhtigan xaadirka ah?
- Sidee ayaa ilmuhu xaaladda u arkay?
- Shaqaaluhu wax is-beddel ah ilmaha ma ku arkeen inta uu xannaanada carruurta joogo?
- Waa maxay baahida qoyska? Sidee ayay xannaanada carruurtu u caawin kartaa xaaladdan?
- Haddii ay mas'uuliyadda waalidnimo labada waalidba saaran tahay:

- Xannaanada carruurta iyo waalidku heshiis noocee ah ayay ka gaari karaa sidii warbixinta laysu dhaafsan lahaa?
- Haddii ay mas'uuliyadda waalidnimo hal waalid oo keliya saaran tahay –

Nidaam sidee ah ayay xanaanada carruurta iyo waalidku isku raaci karaan. Xannaanada carruurtu waa in ay lahaataa qorshe ku aaddan sida loo maaraynayo xiriirka lala leeyahay waalidka kale si looga taxaddaro xaqa ilmaha.

- La kala caddeeyo waxa ay waalidka iyo shaqaaluhu kala sugayaan marka la eego xaaladda soo korortay.

4

Hababka warbixinta:

- Kala caddee qofka ay waalidku doonayaan in ay xannaanada carruurta kala xiriiraan, waxaa habboon qof ay labada waalidka ku kalsoon yihiin.
- Kala caddee goorta iyo inta jeer ee ay madaxa barbaarinta iyo waalidku kulmayaan muddada soo socota.
- Kala caddee sidii warbixinta loo siin lahaa labada waalidba.
- Kala caddee qof walba iyo warbixinta la siinayo.
- Waalidka u sheeg kaalinta xannaanada carruurta iyo sida ay ilmaha muhiimka ugu tahay in wadahadal wanaagsan la yeesho mustaqbalka.
- Ballan cusub qabsada, hubina xiriir joogto ah iyo la socosho wanaagsan.

5

Wadashaqaynta sii socota ee labada waalidba

- Wadahadallada horummarka: Yaa ka qaybqaadanaya? Wadajir mise gooni-gooni? Dadka ay waalidka midkood is-qabaan ee aan ilmaha dhalin xaq uma laha in ay wadahadallada horummarka ka qaybqaataan iyada oo aanay labada waalidba taas oggolaan.
- Qabanqaabooyinka xannaanada carruurta ka dhaca: Yaa ka qaybqaadan kara?
  Sidee ayaa warbixinta loo gudbinayaa?

WELWEL ILMAHA LAGA QABO

Haddii ay shaqaaluhu arkaan in uu ilmuhu dhibban yahay muddo dheer, waxaa markaas muhiim ah in waalidka lagala hadlo kahelitaanka ilmaha. Shaqaaluhu waa in ay ka hadlaan danta ilmaha iyaga oo waalidka ku casumaya in ay ka fikiraan sida uu ilmuhu xaaladda u arko.
Iyaga oo wada jira ayaa loo baahan yahay in ay ka wada hadlaan sidii ay maalinta ilmuhu u noqon lahayd mid sidan ka wanaagsan oo ka ammaan badan. Wadahadalka kaddib waa in ay shaqaaluhu arrinta la socdaan labada waalidna u sheegaan ka-helitaanka iyo horummarka ilmaha.

Haddii ay shaqaaluhu arkaan in aanay waalidka suuraggal u ahayn in arkaan sida ilmaha u roon, waxaa markaas lagu taliyaa in ay xannaanada carruurtu la xiriirto hay'ado kale si hagis iyo la-talin loo helo.

Yay xannaanada carruurtu la xiriiri kartaa?

- XAFIIS QOYS

Maadinta qoysku waa deeq dawladeed oo la helo marka uu kala tag iyo khilaaf waalidka dhex maro. Maadinta qoysku waxay marka uu kala tag yimaado samaysaa dhexdhexaadin sharcigu waajib uga dhigay. Arrintani waxay khusaysaa kuwa is-qaba iyo kuwa wada nool ee carruurta isu dhalay, iyo waalidka doonaya in ay kiis waafaqsan sharciga carruurta maxkamadaha hor geeyaan. Qof keligiis ah, lammaane, lammaane hore iyo qoysaska intuba way la xiriiri karaan. Deeqdani waa bilaash, muhiimna ma aha in qofka loo soo gudbiyo. Xafiiska maadinta qoyska waa laga helaa gobol walba. Waxaa wanaagsan in ay shaqaaluhu waalidka u sheegaan deeqdan.
www.bufetat.no/familievernkontor

- FUB

Guddiga waalidka ee xannaanooyinka carruurta (FUB) waa unug madaxbannaan oo dalka oo idil ka jira looguna tala galay waalidka leh carruur dhigata xannaano carruur. Waalidka iyo xannaanada carruurta labaduba way la xiriiri karaan FUB si ay hagis iyo la-talin uga siiyaan su'aalaha ku saabsan wadashaqaynta waalidka iyo shaqaalaha. Adeegyada FUB waa bilaash.
www.fubhg.no

RUG CAAFIMAAD IYO XARUN QOYS

Rugta caafimaadku waa deeq loo fidiyo carruurta iyo waalidka oo dhan, waxaana ay ku yaallaan dalka oo idil. Rugaha caafimaadka waxaa jooga kalkaalisooyin caafimaad iyo dad kale oo maaddo bartay kuwaas oo bixin kara talo, hagis iyo caawin.

ADEEGGA MAADINTA CARRUURTA

Sharciga xannaanooyinka carruuraha § 22 ee ku saabsan waajibka warbixin u gudbinta adeegga maadinta carruurta, waxaa cutubka koowaad ku qoran: "Shaqaalaha xannaanada carruurta waa in ay shaqadooda la socdaan xaalado keeni kara in uu adeegga maadinta carruurtu hawlgal fuliyo." Xannaanada carruurta waxaa waajib ku ah in ay maadinta carruurta u soo sheegaan haddii ay shaqaaluhu arkaan in ay jiraan wax ilmaha ku adag oo uu dhibban yahay, islamarkaana aanay waalidku muujinayn awood ay wax uga qabtaan xaaladda ilmaha. Waa muhiim in waalidka loo sheego xiriirka ay xannaanada carruurtu la samaysay adeegga maadinta carruurta, xataa haddii ay dhacdo in farriin welwel xambaarsan loo diro maadinta carruurta.

Ka wadahadlid iyada oo aan la sheegayn qofka laga hadlayo

Wadahadalka waalidka lagala yeesho welwelka ay xannaanada carruurtu qabto haddii uu wax isbeddel ah keeni waayo ama ay xannaanada carruurtu u aragto in ay waalidku arrinta ka leexleexanayan ama inkirayaan, markaa xannaanada carruurtu waa in ay la xiriirtaa adeegga maadinta carruurta oo ay ka codsadaan in ay welwelka kala hadlaan iyaga oo aan sheegayn cidda laga hadlayo. Adeegga maadinta carruurta ayaa talo iyo hagis idinka siin kara marinka nidaamka, iyo in ay tahay in ay xannaanada carruurtu welwelkeeda gudbiso iyo in kale.

Waajibka war gudbinta

In welwelka xannaanada carruurtu ay ilmaha ka qabto uu yahay mid weyn oo gaarsiisan in ay waajib ku tahay in ay wargeliyaan adeegga maadinta carruurta, waa in lagu saleeyaa qiimaynta xaaladda gaarka ah ee uu ilmahaasi ku sugan yahay. Mararka qaarkood way iska caddahay in ay xannaanada carruurta waajib ku tahay in ay wargeliyaan adeegga maadinta carruurta. Waxay tusaale ahaan taasi dhacaysaa marka laga shakisan yahay in uu gacanqaad iyo xadgudub qoyska ka jiro, si xun u isticmaalidda mukhaadarraadka iyo daryeelxumo kale. Mararka kalena waxaa xannaanada carruurta khasab ku noqonaysa in ay qaadato go'aammo adag. Khilaafka waalidka dhexdooda ah ayaa keeni kara in farriin loo diro maadinta carruurta.

Haddii laga shakiyo in falal denbi ah lagu galay xannaanada carruurta ama meel ka baxsan waxaa markaas muhiim ah in aan caddaymaha wax loo geysan. Sidaas darteedna shaqaalaha xannaanada carruurtu waa in ay taxaddar ka muujiyaan in ay ilmaha "sidii boolis oo kale u wareystaan", maaddaama ay marka sharciyada ciqaabta la eego taasi keeni karto in ay daciifiso caddaymaha kiiska. Ilmaha waa in la arkaa, la maqlaa, haddii uu ilmuhu doonayo in uu hadlana, waa in ilmaha taas fursad loo siiyaa. Laakiin waxaa shaqaalaha xannaanada carruurta looga baahan yahay in ay ka gaabsadaan in ay ilmaha hadalkii uu yiri su'aalo ka sii weydiiyaan ama ay weydiiyaan su'aal ay jawaabteedii afka u geliyeen. Waa in ay hadalka/sheekada ilmaha iyo su'aalaha qofka weyn ba toos u qoraan wadahadalka kaddib. Qoraalka waa in isla markiiba loo gudbiyaa xeerilaaliska goobtaas ka jira si ilmaha loo wareysto 14 maalmood gudahood laga billaabo markii welwelka la diiwaangeliyay.

Waajibka warbixinta

Mararka adeegga maadinta carruurtu uu xannaanada carruurta ku soo rogo in ay warbixin dhiibaan, adeegga maadinta carruurta ayaa qiimaynaya oo qeexaya in la buuxiyay waajibkii wargelinta, iyo warbixinnada loo baahan yahay in la bixiyo marka kiiskaas isaga ah la eego. Xannaanada carruurtu waxay la xiriiri kartaa adeegga maadinta carruurta si loogala taliyo sidii ay u sharrixi lahaayeen xaaladda ilmaha. Xannaanada carruurtu waa in ay bixisaa warbixinnada uu adeegga maadinta carruurtu dalbado, iyada oo aan taas loo eegayn xiriirka waalidka iyo waajibka xogqarinta midna. Guddoomiyaha gobolka ayaa cabasho loo qaadanayaa haddii wax laysku raaci waayo.

LIISKA SUUGAANTA

Barne- og likestillingsdepartementet og Kunnskapsdepartementet (2009). *Til barnets beste – Samarbeid mellom barnehagen og barneverntjenesten. Lov om barneverntjenester 1992-nr.100*

Ministry of Children and Equality and Ministry of Education and Research (2009). *Til barnets beste – Samarbeid mellom barnehagen og barneverntjenesten [In the child's best interests - Cooperation between day-care centres and the child welfare service]. Lov om barneverntjenester [The Act relating to Child Welfare Services] 1992-no. 100*

The Ombudsman for Children (2012). *Barns stemme stilner i stormen [The voice of children is silenced in the storm].* Report 2012

Brandtzæg, I., Torsteinsson, S. & Øiestad, G. (2013). *Se barnet innenfra. Hvordan jobbe med tilknytning i barnehagen [See the child from within. How to work with ties to the day-care centre].* Kommuneforlaget as

Drugli, M.B. (2008). *Barn som vekker bekymring [Children in jeopardy], 2.* Cappelen akademisk

The UN Convention on the Rights of the Child (1989). Ratified by Norway 08/01 1991

Foreldreutvalget for barnehager (FUB - National Parents' Committee for Kindergartens) (2012). *Hjem – barnehage, et ressurshefte for foreldre og barnehagepersonalet om samarbeid [Home - day care, a resource leaflet for cooperation between parents and day-care staff]*

Gamst, K. T. & Langballe, Å. (2006). *Samtaler med små barn i saker etter barneloven [Dialogues with young children in cases pursuant to the Child Welfare Act].* Ministry of Children and Equality.

Gamst, K. T. (2011). *Profesjonelle barnesamtaler; å ta barn på alvor [Professional dialogues with children; taking children seriously].* Universitetsforlaget

Gustavson, K., Nilsen, W. & Skipstein, A. (2012). *Folkehelseinstituttet 2012:2: Foreldrekonflikt, samlivsbrudd og mekling: Konsekvenser for barn og unge [Parental conflict, breakups and mediation: Consequences for children and young persons]*

Hart, S. (2009). *Den følsomme hjerne [The sensitive brain].* Hans Reitzels forlag

Helskog, G. H. & Lærum, K. T. (2007). *Fortsatt foreldre - godt nok samarbeid etter samlivsbruddet [Still parents - good enough cooperation after the breakup].* Modum bad, Samlivssenteret

Killén, K. (2012). *Forebyggende arbeid i barnehagen; samspill og tilknytning [Preventive work in day-care centres; interaction and ties].* Kommuneforlaget as

The Day Care Institutions Act from 17/06 2005. Ministry of Education and Research

The Act relating to Children and Parents (The Children Act) dated 08/04 1981. Ministry of Children, Equality and Inclusion

Framework plan for the content and organisation of day care institutions (2011). Ministry of Education and Research

Wichstrøm, L., Kårstad S. B., Kvello, Ø., & Berg-Nilsen, T. S. (2013). *Child care health and development, vol. 40/2014 p.346-353; What do parents know about their children's comprehension of emotions? Accuracy of parental estimates in a community sample of pre-schoolers.* ISI Journal Citation Reports

TIBE / ILLUSTRASJON: ENDRE SKANDFER OG ASBJØRN TØNNESEN

NATIONAL PARENTS' COMMITTEE FOR KINDERGARTENS

Postadresse
Postboks 9360 Grønland
N-0135 Oslo

Besøksadresse
Schweigaardsgate 15 B
0191 Oslo

fubhg.no

Norwegian Directorate for Children, Youth and Family Affairs

Postal address
Postboks 2233
N-3103 Tønsberg

Office address
Stensberggaten 27
N-0170 Oslo

bufdir.no

Januar 2015